



Shirkadda Dhextaal

1. WAAJIBAADKA SHAQO EE MAQAL-HAYE

1. Jagada	Maqal-haye
2. Goobta	Garowe, Puntland-Somaaliya
3. Nooca shaqo	Laba gelin
4. U warbixinayaa	Maamulaha
5. Guud-mar shaqo	Maqal-hayaha shirkadda waxaa laga raba in uu soo bandhigo fur-furaan, soo-dhowayn iyo ugu adeegid hagar la'aan dhammaan macaamiish hab waafaqsan hiigsiga shirkadda iyo hab-qancinta macaamiisha. Sidoo kale waa in uu il gaar ah ku hayaa macaamiisha joogtada ah haysashadooda iyo soo jiidashada kuwa cusub.
6. Waajibaadka shaqo	<p><i>Waajibaadka shaqo ee laga rabo Maqal-haye waa;</i></p> <ul style="list-style-type: none"> • Martigelinta iyo maamuuska macaamiisha • Soo dhowaynta macaamiisha • Qaabilaadda iyo qancinta cabashooyinka macaamiisha • Qoridda dalabaadka macaamiisha • Qabashada taleefanada macaamiisha wax soo dalbanaya • Kala jihaynta dalabaadka kabalyeeriyada • Diwaan-gelinta macaamiisha joogtada ah

	<ul style="list-style-type: none"> • Samaynta xisaab celin maalinle, toddobaadle iyo bile' ah • Gaarsiinta macaamiisha isbeddelada iyo adeegyada soo cusub • U gubinta maamulaha warbixinta maalinta, toddobaadka iyo bisha • Dhiirigelinta iyo dhaqaajinta shaqaalaha
7. Xirfadda	<p><i>Waa in uu leeyahay Maqal-hayuhu xirfadahaan soo socda;</i></p> <ul style="list-style-type: none"> • <i>U adeegidda macaamiisha</i> • <i>Martisooridda iyo maamuuska macaamiisha</i> • <i>Xisaabinta wixii soo galay iyo wixii ka baxay</i> • <i>Xirfadda Is-gaarsiinta wixii war iyo wacaal ah</i> • <i>Xirfadda kumbuyuutarka</i> • <i>La shaqaynta koox</i> • <i>Ku hadalka iyo qoridda Soomaaliga iyo Ingiriiska</i>
8. Waaya-aragnimada	<p><i>Waa in uu leeyahay maqal-hayuhu waaya-aragnimo ugu yaraan laba sano</i></p>
9. Aqoontan	<ol style="list-style-type: none"> 1. <i>Heerka 1aad Maaraynta ganacsiga (Bachelor degree BBA), Food Science and Nutrition (FN) ama Shahaado u dhigmata.</i> 2. <i>Dugsi sare iyo shahaado ka saraysa oo ah maaraynta ganacsiga (Diploma of Business administration)</i>
10. Tix-raac	<p>Haddii aad buuxin kartid shuruudaha la iska rabo, aadna doonaysid in aad codsatid shaqadaan fadlan ku soo dir Taariikh-nololeedkaaga (CV and a cover letter) iyo 2 damiin (References) ugu danbayn 11-17/02/2018 ciwaankaan dhextaalrestaurantandcafe@gmail.com ama wac 0906551320</p>